



Apple Health Expansion

Ballaarinta caymiska caafimaadka muhaajirka ee Washington, iyadoo sababtuna tahay in caafimaadkaagu uu muhiim yahay

Caymiska Washington Apple Health ayaa la ballaarinayaa waxaanna la gaarsiinayaa dadka qaangaarka ah ee ay da'doodu tahay 19 iyo ka weyn oo leh xaalado socdaal ee qaar. Barnaamijkan cusub waxaa loogu yeeraa Apple Health Expansion.

Adeegyada la caymiyay

Caafimaad

- Booqashooyinka adeeg-bixiyaha
- Adeegyada cusbitaalka
- Xarunta kalkaalinta ee loogu talagalay daryeelka baxnaaninta iyo xirfadda

Ilkaha

- Adeegyada ka-hortagga, baaritaannada, iyo habraacyada baarista
- Restorative (buuxinta ilkaha), periodontal (cudurrada ku dhaca cirridka), endodontic (dilista xidid-siibka iyo cubidda ilkaha), iyo ilkaha la gashado
- Qalliinka afka

Caafimaadka Habdhaqanka

- Adeegyada daaweynta xanuunka isticmaalka maandooriyaha
- Daaweynta caafimaadka dhimirka

Farmashiyaha

- Daawooyinka la iska soo iibsado iyo kuwa dhakhtarka dad u qoro ee ku jira liiska daawada la doorbido ee Apple Health

Adeegyada gaarka u ah dadka qaangaarka ah ee da'da yar ee da'doodu u dhaxeeyo 19 ilaa 20

- Baaritaannada wanaagga
- Qalabka aragga
- Daryeelka irbado ku daaweynta
- Ilko toosinta

Adeegyada aan la heli karin

Adeegyada aan la caymiyay waxaa ka mid ah, balse aanay ku xaddidnayn:

- Baaritaanka hore ee muddo ka-dibba mar la sameeyo, oggaanshaha cudurrada, iyo daaweyn (EPSDT)
- Kormeerka la taageero
- Kalkaalinta waajibaadka gaarka ah
- Daryeelka xarunta kalkaalinta muddada-dheer
- Barnaamijka Caafimaadka Guriga
- Xarunta daryeelka dhexe



Kumaa xaq u leh?

Waxaad xaq u yeellan kartaa barnaamijka Apple Health Expansion haddii aad:

- Tahay qof Washington deggan oo da'diisu tahay 19 ama ka weyn,
- Leedahay dakhliga ah ama ka hooseeya xadadka la muujiyay,
- Aadan xaq u lahayn barnaamijyada kale ee Apple Health (Medicaid) oo ku saleysan xaaladda socdaalka,
 - o Muhaajiriinta aan ka soo bixin muddada sugitaanka shanta-sano si ay xaq ugu yeeshaan Apple Health xaq uma lahan Apple Health Expansion.
- Aadan uur lahayn ama aadan lahayn uur dhammaaday 12-kii bilood ee la soo dhaafay, iyo
- Aadan xaq u lahayn qorsheyaasha qualified health oo leh canshuur dhaafka lacagta joogtada ah ee caymiska ee horumarsan ama barnaamijyada gargaarka caafimaadka ee ay dowladda federaalka maalgeliso.

Isku qoritaanka Apple Health Expansion waxay ku xiran tahay booska barnaamijka ka bannaan. Wax badan ka ogow hca.wa.gov/ahe-enrollment.

Jaangooyada dakhliga

Inta uu Qoyska Le'eg Yahay	1	2	3	4	5
Dakhliga bil kasta	\$1,732	\$2,351	\$2,969	\$3,588	\$4,207
Inta uu Qoyska Le'eg Yahay	6	7	8	9	10
Dakhliga bil kasta	\$4,825	\$5,444	\$6,063	\$6,682	\$7,300

*Ku saleysan jaangooyooyinka Abriil 2024. Jaangooyada ku waajibta isbeddel sannad kasta.

Sida loo codsado

Haddii ay da'daadu u dhaxeeyo 19 ilaa 64 sano jir:

- **Barta internet-ka:** Booqo [wahealthplanfinder.org](https://www.wahealthplanfinder.org)
- **Telefoonka:** Ka wac Xarunta Taageerada Macmiilka ee Washington Healthplanfinder lambarkan 1-855-923-4633

Haddii aad tahay 65 sano jir ama ka weyn:

- **Barta internet-ka:** Booqo [washingtonconnection.org](https://www.washingtonconnection.org)
- **Telefoonka:** Codso codsiga adiga oo wacaya 1-877-501-2233

Wax badan ka ogow

Haddii aad rabto macluumaad ku saabsan Apple Health Expansion iyo siyaabaha kale ee loo codsado, booqo hca.wa.gov/apple-health-expansion.

Caymiska kale ee Apple Health

Macaamiisha waxay awoodi karaan in ay helaan noocyada kale ee caymiska Apple Health.

Eeg shuruudaha xaq-u-yeelashada ee:

- Carruurta: hca.wa.gov/apple-health-children
- Haweenka uurka leh: hca.wa.gov/apple-health-pregnant-individuals
- Caymiska uurka ka-dib: hca.wa.gov/apc
- Apple Health loogu talagalay dadka aan muwaadiniinta ahayn: hca.wa.gov/apple-health-non-citizens

